

Hel midho iyo khudaar bilaash ah

Rugta caafimaadka ee Dugsiga Sare ee Camden waxay bilaabaysaa barnaamij lagu helo miro iyo khudaar la geynaayo guryaha ardayda si bilaash ah. Ardayda u qalanta waxay heli karaan miro iyo khudaar loo keenayo labadii toddobaadba mar mudo lix bilood ah.

Maxaad uga qayb qaadanaysaa? Si loo dhiirigeliyo cunto caafimaad leh oo aad heshaan adiga iyo qoyskaagaba!

Si aad isu diiwaangeliso, booqo rugta dugsigaaga (Qolka 212) si aad u aragto inaad u qalanto oo aad u ogaato xog dheeraad ah. Haddii aad doorato inaad ka qaybgasho, ciwaankaaga iyo lambarka taleefanka ayaa lala wadaagi doonaa ururka bixinaya cuntada.

Si kastaba ha ahaatee, macluumaadkaan waa lagu hayn doonaa qarsoodi mana jirto cid lala wadaagi doonno ogolaanshahaaga laa'iintiis.

Wixii macluumaad dheeraad ah,
wac ama qoraal u dir:
612-668-1944